

TILL
SAM
MANS
FÖR SKELLEFTEÅ



6 bisha Maay waa maalinkii waa maalintii soo diyaarinta Tillsammans för Skellefteå- waa maalin muhiimad weyn leh oo dhamaan dadka Skellefteå degan ay muujinayaan ka hortagista cunsuriyada och fikradaha qaldan isla markaasna la xoojinayo wadajirka dadka.

Inagoo xidhan midabo dhalaalaya, farxadna wada haysana si ay dheehan tahay nidaam iyo bilaa buuq ayaan muujinaynaa in qeybtan aynu dunida kaga noolnahay inay tahay meel ay cidkastaa ku noolaan karto. Kaalay oo ka qeybqaado ! lasoco in maalinta ay tahay maalinkii caruurta, dhalinyarada, asxaabta iyo dadka raba inay dhahaan oraah ku sahabsan cadaalada , wadajirka bulshada. Waa fursad qaaliya oo aynu ku muujinayno ficil wanaagsan.

Qorshaha maalinta:

10:45 waxaa lagu kulmayaa guriga ummada(folkparken) waxaana la isku diyaarinayaa in loosoo lugeeyo suuqa.

11:00 waxaa socod lagu imanayaa ilaa suuqa. Ayadoo la ciyaarayo muusiko lana muujinayo wadajir

11:30-13:30 waxa bilaabmeysa xaflad iyo maaweelo suuqa dhexdiisa ayna ka mid yihiin Muusiko, gabayo, jaas. Waxa la dhadhaminayaa rooti ka kala yimid wadamo kala gedisan waxaana lala kulmayaa dad ka yimid wadamo kala gedisan dhaqankooduna kala duwan yahay.

Waxa soo baxaya bas bilaasha oo aad kasoo qaadan karto tuulooyinka ku xeeran magaalada. Ka fiirso wakhtiyada ay baxayaan websaytka. Basku waxuu magaaladada ku laabanayaa 14:30 waxuuna ka baxayaa senterka Skellefteå.

Kusoo labiso dhar kaladho dhalaalaya leh una dabaal deg maalinta wadajirka iyo kala duwanaanshaha ummadaha